



Somaliska

Kusoo Dhawoow Iskuulka Xanaanada Furan ee Magaalada Göteborg!

Kani Waa Iskuulka Xanaanada Furan

Iskuulka xanaanada furan waxay goob-furan u tahay qoysaska. Carruurta ay da'dooda u dhaxeyso 0-6 sano ayay u furantahay ayagoo ay wehliyaan waalidiintooda ama ay la socdaan qof kaloo wayn oo muhiim u ah. Adiga wayn ayaa mas'uul ka ah ilmahaaga, waxaana ugu qaybqaadanaysaan hawlaha si wadajir ah. Iskuulka Xanaanada Furan waa lacag la'aan.

Noocyada Kala Duwan ee Hawlaheena

Sida ku cad hab-tilmaamyada magaalada Göteborg iskuulada xanaanada furan waa inuu bixiyaa waxqabadyo waxbarasho iyo xiise-kicin bulsho. Waxaan bixinnaa:

- » Waxqabad furan oo ogaysiis la'aan ah. Imaansha ballan-la'aan ah (Drop-in) oo u furan qoysaska dhan oo ay carruurtooda u dhaxeeyaa 0-6 sano.
- » Waqtivo gaar ah. Imaansha bal-lan-la'aan ah (Drop-in) oo kooxo gaar ah ku wajahan, is-diiwaan gelin la'aanna ah.
- » Hawlo-kooxeed. Koorsooyin taageeridda-waalidiinta oo u baahan is-diiwaan gelin.
- » Muxaadaraad la xariira waalidnimada iyo qaar kale.



Waxaan haynaa hawlo oo adiga iyo ilmahaaga oo wada jira kicin doono xiisahooda iyo rabitaankooda in wax bartaan. Booqashada aad nooga imaanseysaan waxay u adeegaysaa isu diyaarinta xanaanada ama daryeelka waxbarasho.

Waxaan ku siin karnaa talooyin iyo taageero oo la xariirta howlahaaga waalidnimo.

Halkaan waxaad kula kulmi kartaa carruur kale iyo dad waa wayn si aad u ciyaartid, wax u abuurtid, isla heestaan ama in aad iska joogtid.



Taageero Diiradda Lagu Saarayo Qoyska

Annaga ka shaqayna iskuulka xanaanada furan waxaanu leennahay waxbarasho tarbiyo. Iskuulka xanaanada furan, waxaanu ku shaqaynaa Diirad-saaridda qoyska.

Waxa ay ka dhigantahay in aan wadashaqayn la leennahay tusaale ahaan rugta-ummulisada, rugta caafimaadka ilmaha (BVC), dadka ka shaqeeya ka hortagyada ee howlaha arrimaha bulshada iyo mактабадда. Waxaa kaloo bixinnaa koorsooyin iyo talo-bixinno, oo ay kujiraan arrimaha waalidnimada.

Sii akhri noocyada taageero ee waalidnimada oo kajirta aaggaaga goteborg.se/foraldrastod



Hel Iskuulada Xanaanada Furan

Göteborg waxaa ku yaalla labaatameeyo iskuulada xanaanooyinka furan oo ay degmada leedahay.

Waxaad ka heli kartaa macluumaadkooda halkaan:
goteborg.se/oppnaforskolan

Qoysaska Caafimaadka Qabo Soo Dhowaada

Carruurtu waa inay caafimaad qabaan si ay u awoodaan ciyaaridda iyo ka qaybqaadashada hawlaho ka socda iskuulka xanaanada furan. Si loo yareeyo khatarta faafidda cudurrada waxa ay iskuulada xanaanada furan raacayaan tilmaamaha hay'adaha dowladda.

Waa Mamnuuc Looska Ama Lawska

Waxaa iskuulka xanaanada furan yaala oo laga iibsan karaa qaxwo iyo shaah. Adiga booqde ahaan waxaa soo qaadan kartaa cuntadaada fudud, laakiin waa in aad hubisaa in aanu ku jirin loos, laws, yicib, sisin, sababtuna waa xasaasiyadaha.

Maamulka Iskuulada Xanaanada

Maamulka iskuulada xanaanada wuxuu mas'uul ka yahay ku dhowaad 20 iskuulada xanaanada furan iyo 400 oo iskuulada xanaanada ee degmada ah iyo 65 guri-xanaano-maalmeed ah oo loogu talo galay qiyaasti 25 500 oo carruur ah oo ku nool magaalada Göteborg.

Maamulku waxaa kaloo mas'uul ka yahay korjoogtaynta xanaanooyinka gaarka loo leeyahay iyo guri-xanaano-maalmeedyada. Guud ahaan waxaa maamulka ka shaqeeya qiyaasti 8000 oo shaqaale.

Telefoon: 031-365 09 60